



CHILDREN'S THERAPY CENTER

Celebrate what is. Commit to what can be.


Waan ku salaamay! Inta aan kula sii wadno safarkan ilaa iyo inta looga gudbayo cudur safmar ah, ayaa waxaan doonaynay in aan kula wadaagno qorsheyaasheenna ugu dambeeyay ee loogu talagalay sida aan u sii wadi karno bixinta adeegyadeennada guriga ku saleysan, Waxqabadka Hore (0-3 sano) ee carruurta iyo qoysaska.

Bedqabka qoyskaaga iyo sidoo kale bedqabka hawlwadeennada ayaa weli sii ah mudnaanteenna ugu sarreysa. Waa in aynu raacno dhammaan shuruucda CDC, Waaxda Caafimaadka iyo dowladda. Adeegyadeenna Waxqabadka Hore ayaa hoostaga Taageerada Hore ee loogu talagalay Carruurta Yaryar iyo Kuwo Socod-baradka ah (ESIT). Muuqaal shaxeedka hoose ayaa muujinaya qorshaha dib-u-gelidda bilowga amaanka ah ee barnaamijkeenna ee la jaanqaada ESIT iyo marxaladaha Bilowga Amaanka ah ee Washington.



CTC Services in Relation to Washington's Safe Start Phases

Early Intervention (Ages 0-3)



Early Support for Infants and Toddlers (ESIT) Provider Agency Stages in Relation to Washington's Safe Start Phases

***Adeeyo Meelo Fogfog Laga Bixiyo:** Dhammaan adeegyada ayaa meelo fogfog laga bixiyaa iyada oo loo marayo shirarka fiidiyowga (telehealth) iyo xiriirka telefoonka.

***Marxaladda 1-aad ee ESIT/Marxaladda 2-aad ee Bilowga Amaanka ah ee Washington:** Adeeyo Shakhsiyeed ee Xaddidan. Adeegyada aasaasi ahaan waa kuwo fogfog, haseyeeshee xaalado xaddidan oo ka reeban ayaa la sameyn karaa oo loogu talagalay adeegyada qof ahaanta loo bixiyo si loo daboolo baahiyada gaarka ah ee ku saleysan baahida caafimaad. Xaaladaha ka-reeban waxaa ka mid ah: baahiyada quudinta degdegga ah ee aan meelo fog laga sameyn karin, baahiyada meelayn iyo midda jireed ee adag, qiimeynta AAC iyo caafimaadka la

xiriira taageerada iyo adeegsiga qalabka, caqabadaha helitaanka waxqabadka telefoonka, iyo adeegyada aragga ee adag ee aan meelaha fogfog laga sameyn karin.

*** Marxaladda 2-aad ee ESIT/ Marxaladda 3-aad iyo 4-aad ee Bilowga Amaanka ah ee Washington:** Adeegyo Shakhsiyeed ee La Ballaariyay. Marxaladdan, waxaan ballaarin doonaa ikhtiyaarada adeegga shakhsiyeed iyada oo sidoo kale la sii wadayo bixinta adeegyada meelo fogfog laga bixiyo. Faahfaahinta la go'aamin doona.

***Marxaladda 3-aad ee ESIT/ Marxaladda 4-aad Marxaladda Ka-dib Bilowga Amaanka ah ee Washington:** Ku noqoshada adeegyo shakhsiyeed oo buuxa, iyada oo adeegyada meelaha fogfog laga bixiyo ay yihiin ikhtiyaari marka la doorbido.

Qorshahan waa mid daganeyn wuunna isbeddeli karaa, iyada oo ku xiran dhaqdhaqaaqa fayraska ee bulshooyinka; helitaanka tallaal; daaweyn cusub oo la helo, iwm. Fadlan ogow in aan kula soo socodsii doono isbeddelo kasta.

Waqtiyadan waa waqtiyo anagga oo dhan nagu adag balse waxaa naga go'an in aan idin taageerno adiga iyo cunugaagaba habka ugu amaansan ee suuragalka ah. Waad ku mahadsan tahay fahamkaaga iyo dulqaadkaaga. Fadlan aan oggaado haddii aad qabto su'aalo dheeraad ah. Waxaad igala soo xiriiri kartaa 253-216-0831, ama karens@ctckids.org.

Si daacad ah,

Karen Stedman, Agaasimaha Barnaamijka EI